

Ka ilaalinta qoysaskeena jadeecada

Waa maxay jadeecadu?

Jadeecadu waa cudur halis ah oo ku faafaya bulshooyinkeena. Waxaa keena fayras aad u faafa oo si fudud ugu gudba marka qof qaba fayrasku hadlo, qufaco ama hindhiso. Waxa uu ku sii nagaan karaa qol laba saacadood ka dib marka qofkii tagay.

Dhallaanka, ciyaalka yaryar, dumarka uurka leh, dadka waaweyn iyo kuwa kale ee difaaca jidhkoodu daciifka yahay ayay u badan tahay in ay aad ugu xannuunsadaan jadeecada.

Sidee qoyskayga iyo aniguba uga hortagi karnaa jadeecada?

Tallaalka jadeecada (sidoo kalena loogu yeedho tallaalka MMR) ayaa ah ka hortaga ugu xooga badan. Hal qaadasho waxa ay ka hortagtaa 93% dadka inay ku dhacdo jadeeco, labo qaadashona waxay ilaalisa 97% dadka. Waana sidoo kale in aad ka fogaato dadka laga yaabo in ay qabaan.

Sidee tallaalku u shaqeeyaa? Badqab ma leeyahay?

Tallaalka jadeecada waxaa lagu bixiyaa laba qaadasho. Qaadashooyinka waxa ku jira nooc fayraska ah oo la wiiqay awoodiisa oo baraya jidhkaaga in uu la dagaalamo xannuunka. Tallaalka MMR wuxuu sidoo kale ka hortagaa qaamo-qashiirka iyo rubella.

Tallaalka waxa la caddeeyay in uu badqab leeyahay tobanaan sanno. Dadka qaar ayaa saamayno dadban arka maalin ama labo. Saamaynaha dadbani aad bay uga waxyeello yar yihiin jadeecada. Bixiyaha daryeelkaaga caafimaad ama farmashiistaha ayaa kaaga jawaabi kara su'aalaha ku saabsan tallaalka laga yaabo in aad qaadato.

Waa kuwan waxa ay tahay in aad ogaato haddii aanad ka tallaalayn jadeecada.

Waa in aad u firsato calaamadaha xannuunka. Inta badan dadka aan tallaalayn ee uu ku dhaco fayraska jadeecadu ayaa aad u xannuunsada. Haddii aad leedahay qandho daran, qufac iyo indho cas, joog guriga dadka kalena ka fogoow, ee ay ka midka yihiin xubnaha qoyskaaga. Haddii aad aragto finan, wac rug caafimaad ama dhakhtar.

Haddii ay kugu dhacdo jadeeco, waa in aad guriga joogtaa 21 maalmood, xataa haddii aadan isku arag calaamado. Iska ilaali ku dhowaanshaha dadka kale, sababtoo ah waad faafin kartaa fayraska ka hor inta aadanba dareemin xannuun.

Weli waad istallaali kartaa 72 saacadood gudahood ka dib marka ay kugu dhacdo jadeecadu. Tani waxa ay kaa ilaalin kartaa in aad xannuunsato ama ay hoos u dhigto calaamadaha.

doh.wa.gov/so/measles-somali

Sidee isu tallaali karaa?

Rugtaada caafimaad, farmasigaaga ama xafiiska dhakhtarkaaga ayaa adiga iyo qoyskaagaba siin kara tallaalka jadeecada. Tallaalo bilaash ah ayaa u diyaar ah carruurta iyo dadka waaweyn ee aan caymiska lahayn. Gaari raacid Qaadis socdaal oo ku geynaya rugta ayaa diyaar ah meelaha qaarkood, sidoo kale.



Iskaan-garee si aad u hesho khariiradad muujinaysa goobo haya tallaalka jadeecada oo bilaash ah oo loogu talo galay dadka waaweyn ee bilaa caymiska ah iyo ciyaalka 18 jir iyo ka yar.